

**Sharci lamba. 25 ee 17 Disember 1967;**

**“Burrin Canshuurta Qiimeynta kharajka dibedda iyo wax ka bedelka xuquuqda Maamulka iyo qorsheynta”**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Kadib markii uu helay oggolanshaha Golaha Qaranka;

**WAXAA LA SOO SAARAY**

Sharciga halkan ku qoran:

**Qod. 1**

**Burrinta Canshuurta Qiimeynta**

Laga bilaabo 1da Janaayo 1968 waxaa la joojiyey canshuurta qiimeynta lacagaha kharajka ee dibedda oo si meel gaar lagu dhisay Xeerad-sharci lamba. 3 ee 28 Disember 1967 iyo wax ka bedelladii ku xigay.

**Qod. 2**

**Wax ka Beddelid Xuquuqda Maamulka iyo Qorsheynta**

Laga bilaabo 1da Janaayo 1968, heerka xuquuqda maamulka iyo qorsheynta ee alaabka dalka la keeno waxaa la kordhiyeyey 8% ilaa 10%.

**Qod. 3**

Xeerkaani wuxuu hirgeli doonaa maalinta lagu soo daabaqo Faafinta Rasmiga oo lagu keydiyo Keydka Rasmiga ee Shuruucda iyo xeerarka ee Jamhuuriyadda Somaliya.

Waxaa la faraya cid kasto in ay u hoggansanadaan sharcigaan uuna u hoggamiyaan sharcigaan.

Muqdisho, 17 Disember 1967

**Abdirashiid Ali Shermarke**

Rai'sul Wasaaraha ku meel gaar ah  
**Hagi Farah Ali Omar**